# HPV vaccination

Iska ilaalinta infekshanka HPV si ay kaaga caawiso yareynta halista aad ugu jirto kansarka



## Barnaamijka tallaalka HPV-ga ee caalamiga ah

Tallaalka HPV waxa la siiyay dhammaan gabdhaha ku jira sannad dugsiyeedka 8 laga soo bilaabo Sebtembar 2008. Laga soo bilaabo Sebtembar 2019 tallaalka waxaa sidoo kale la siiyay wiilasha ku jira sanad dugsiyeedka 8.

Tani waxaa sabab u ah caddaynta ah in tallaalka HPV uu ka caawiyo wiilasha iyo gabdhaha kahortagga kansarada la xiriira HPV.

**In ka badan 280 milyan oo doosaska/qiyaasaha tallaalka HPV ah ayaa laga bixiyay adduunka oo dhan, oo ay ku jiraan 120 milyan oo doos/qiyaasood oo lagu bixiyey gudaha Mareykanka iyo in ka badan 10 milyan oo lagu bixiyey gudaha UK.**

### Tallaalka HPV waxa uu kaa caawinayaa kahortagga ah in aad qaaddo fayraska ‘papillomavirus’ (HPV).

Fayraskani waxa uu kordhiyaa khatarta ah in ay kugu dhacaan qaar ka mid ah kansarrada xilli dambe ee noloshaada, sida:

- kansarka ilmo galeenka
- qaar ka mid ah kansarada ku dhaca afka iyo dhuunta/cunaha
- qaar ka mid ah kansarada ku dhaca futada iyo xubnaha taranka

Tallaalka HPV kama hortaggo cudurrada kale ee galmada lagu kala qaado.



# HPV iyo sida uu u faafo

**Infekshanka HPV waa caabuq caam ah.** In ka badan 70% ee dadka aan la tallaalin ayaa qaadi doona

70%

**HPV waxaa uu ku nool yahay maqaarka gudaha iyo hareeraha xubinta taranka oo dhan**, sidaas darteedna isticmaalka kondhomka si dhamaystiran kaagama difaacayo HPV

Waxaa jira **noocyo badan oo kala duwan** oo HPV ah

Infekshannada HPV intooda badan ma sababaan wax calaamado ah **oo iskood ayay u roonaadaan**

**Calaamadaha qaar ma baaba’aan** waxayna sababi karaan kansar halka calaamadaha kalena ay sababaan burooyinka xubinta taranka

## Waa maxay isbedelka uu sameeyay tallaalka HPV ilaa hadda?

Shan iyo toban sano laga soo bilaabo bilawgii barnaamijka tallaalka ee UK waxaa hoos u dhac weyn ku yimid infekshannada HPV iyo tirada dhallinyerada ee qaba burooyinka xubinta taranka.

Wakhti kadib waxa la filayaa in talaalka uu gudaha UK ku badbaadiyo boqolaal nafood sanad walba.

**Si tallaalka uu kuu siiyo difaaca ugu fiican, tallaalka waa in la qaataa kahor inta aadan noqon qof galmo ahaan firfircoon.**

**Haddii aad galmo ahaan firfircoon tahay waa inaad weli qaadataa tallaalka.**

## Qaadashada tallaalka HPV

Tallaalka waxaa cirbad ahaan loogu mudaa cududdaada sare.

Dadka intooda badan waxay u baahan doonaan oo keliya hal qiyaas si ay u helaan difaac. Tallaalkan waxaa badanaa la bixiyaa waqtiga aad ku jirto fasalka 8aad.



## Tallaalka HPV

Tallaalka HPV ee loo isticmaalo **Jadwalka talaalka NHS** waa Gardasil 9 wuxuuna ka hortaggaa 9 ka mid ah noocyada HPV ee sababi kara kansar iyo burooyinka xubinta taranka ee dadka intooda badan iyagoo qaadanaya keliya hal doos/qiyaas.

## Waxaan seegay qaadashada tallaalkaygii, weli ma qaadan karaa?

Haa. Haddii aad seegtay qaadashada tallaalka intaad ku jirtay dugsiga, waa inaad isku daydaa oo aad sida ugu dhakhsaha badan u qaadataa.

La xiriir kalkaalisada dugsiga, kooxda tallaalka dugsiga ama rugta GP-ga si aad ballan u qabsato.

Waxaad u qalantaa inaad qaadato tallaalka ilaa aad ka gaarayso sanadkaaga 25aad.

## Haweenka qaatay tallaalka ayaa weli u baahan doona inay aadaan baaritaanka afka ilmo-galeenka

Dhammaan dumarka da'doodu tahay 25 iyo ka weyn ee ku nool England waxaa la siiyaa baaritaanada afka ilmo galeenka. Tallaalka HPV waxa uu ka hortagi doonaa ilaa 90% ee kiisaska kansarka ku dhaca ilma-mareenka, laakiin haweenku waa inay wali ka xaadiraan baaritaanka afka ilmo-galeenka markii lagu casuumo inay ka soo xaadiritaan.





## Ka waran kansarada kale?

Hadda ma jiraan barnaamijyo loogu talagalay baaritaanka kansarada kale ee la xiriira HPV. Haddii aad ka welwelsan tahay wax calaamado ah, la hadal dhakhtarkaaga GP-ga.

## Waxyeellooyinka gaarka ah

Si la mid ah tallaallada kale intooda badan, waxyeellooyinka gaarka ah ee tallaalka HPV waa kuwo fudud. Xanuunka, bararka iyo guduudashada cududa tallaalka lagu durey ayaa ah wax iska caadi ah laakiin waxay baaba'aan dhowr maalmood gudahood. Waxyeelooyinka gaarka ah ee aadka u daran waa kuwo aad dhif u ah.

Tallaalku waxa uu ka gudbay heerarkii tijaabada badbaadada ee adkaa si loogu isticmaalo gudaha Boqortooyada Midowday (UK) waxaana loo arkaa in uu yahay tallaal badbaado badan. Malaayiin qiyaasood/doos oo tallaal ah ayaa durba la siiyay wiilasha iyo gabdhaha ku nool UK iyo adduunka oo dhan. Si la mid ah dhammaan tallaallada, warbixin kasta oo ku saabsan waxyeellooyinka gaarka ah ee tallaalka si dhow ayaa loola socdaa oo dib u eegis loogu sameeyaa.

Haddii aad la kulanto waxyeellooyin gaar ah oo looga shakisan yahay tallaalka, waxaad waxyeellooyinkaas uga warbixin kartaa websaydka Yellow Card ama adigoo wacaya **0800 731 6789** (9am ilaa 5pm Isniinta ilaa Jimcaha) ama adigoo soo dejisanaya ablikeeshinka Yellow Card.

**www.mhra.gov.uk/yellowcard**

# Xusuusnow

- si aad hadda u qaadato tallaalkaaga HPV, si aad mustaqbal naftaada uga ilaaliso dhawr nooc oo kansaro ah
- tallaalku waxa uu gudaha UK ku badbaadinayaa boqollaal qofood sanad walba
- xitaa adigoo haysta difaaca tallaalka HPV waxaad weli u baahan doontaa inaad marto baaritaanno caafimaad, sida baaritaanka afka ilmo-galeenka laga bilaabo da'da 25

## Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo www.nhs.uk/hpv

Liis dhamaystiran oo ah maaddooyinka uu ka samaysan yahay tallaalka Gardasil 9 ayaa lagu bixiyey warqadda macluumaadka bukaanka (PIL): **www.medicines.org.uk/emc/product/7330/pil**

Guudmarka Sifooyinka Badeecada/Tallaalka (SPC): **www.medicines.org.uk/emc/product/7330/smpc/print**

NHS

HPVACTION.ORG

Warqadan waxaa soo saartay Hay'adda Ammaanka Caafimaadka ee UK.
**Tallaalka, gacan ka gaysanaya ilaalinta qof walba oo jira da'a kasta.**

Warqaddaan waxaa laga dalban karaa ama laga soo dejisan karaa: **www.healthpublications.gov.uk**, adigoo wacaya: 0300 123 1002 (khadka waxay furan yihiin 8am ilaa 6pm Isniinta ilaa Jimcaha). Warqaddaan ayaa sidoo kale la heli karaa iyadoo loo turjumay luqadaha soo socda: Albaniyan, Carabi, Bengali, Baraasiil Pt., Bulgaariya, Shiineys, Isbaanish, Istooniyaan, Farsi, Fijian, Giriig, Gujarati, Hindi, Kurdish, Latfiya, Lithuanian, Nepali, Panjabi, Pashto, Polish, Romany, Romanian, Ruush, Soomaali, Tagalog, Turkish, Twi, Tigrinya, Yukreeniyaan, Urduuga, Yiddish iyo Yoruba

© Crown Copyright 2023. Product code: HPVU1L-SOM. 3P 850K MAY 2023 (APS)
UK Health Security Agency gateway number 2023-042 Somali